



## Shaqada tayada biyaha oo dhici doonta xagaagan

PPS waxay qorshaynaysaa in ay yeelato halka biyaha laga cabو ka soo baxaan “drinking fixtures” iyo halka qasabadaha biyaha laga cabو ka soo baxaan ee jikada “faucets” ee ku yaala dugsiyada oo dhan la beddolo dhammaadka xagaaagan. Shaqaaluhu waxay ku hawlanaan doonaan dhammaan degmada ee bedelaada meelaha biyaha laga cabو “drinking fountains” iyo tijaabinta niyaamyada si loo xaqijiyo in ay buuxinayaan heerarka u yaala tayada biyaha oo hadda ka sareeya kuwa ay waajibka ka dhigtay EPA.

Degmadu waxay adeegsanaysaa habka tallaabo-tallaabo ah si loo xanibo halka dhibaatooyinka kiimikada lead iyo copper heerkoodu sarreeyo ka imaanayaan iyada oo ka bilaabaysa beddelaada halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures”, ka dibna dib ayaa loo tijaabiya ka hor inta aanan loo gudbin tallaabada dhibaataada badan isla markaana qaaliga ah ee furida derbiyada iyo beddaalada tuubooyinka biyaha. Shaqada waa la kala qaybiyay si qandaraaslayaasha khibrada u leh tuubooyinka biyaha ‘plumbing’ diiradda u saaraan kooxaha ka mid ah 15 dugsi oo kasta.

Biyaha hadda dib ayaa looga daaray kuwaasi oo ku yaala goobaha dadka ka dhexeeyaa ee biyaha laga cabو “drinking fountains” iyo halka qasabadaha biyaha laga cabо ka soo baxaan ee jikada “faucets” ee 30 dugsi oo ku kala baahsan degmada oo ah labada kooxood ee u horreeya. Dugsiyada ka tirsan Kooxda 1 waa Applegate, Astor, Atkinson, Beverly Cleary/Fernwood, Chapman, Chief Joseph, Hayhurst, Lewis, Meek, Richmond, Rose City Park, Sacajawea Head Start, Skyline, West Sylvan, iyo Woodstock.

Dugsiyada ka tirsan Kooxda 2 waa Beach, Boise-Eliot/Humboldt, Cesar Chavez, Clarendon Head Start, Creston, George, James John, Jefferson, Martin Luther King Jr., Ockley Green, Peninsula, Rosa Parks, Sitton, Vernon iyo Woodlawn.

Halka biyuhu ka soo baxaan “fixtures” ayaa laga bedelay in ka badan 30 dugsi, Kooxahan ka tirsan 3 iyo 4 ayaa hadda sugaya tijaabada. Shaqada beddelaada tuubada halka biyuhu ka soo baxaan ‘fixture’ ee dugsiyada ka tirsan Kooxda 5 waxay bilaabmi doontaa bartamaha Juun, iyada oo shaqada bedelaada ee Kooxda 6 ay tahay in ay bilaabanto dhowr toddobaad ka dib.

Meelaha biyaha laga cabو “drinking fixtures” ee fasalka dhexdiisu waxay u baahnaan doonaan shaqo ballaaran waqtii dambe ayaana wax laga qaban doonaa.

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah, booqo [Website-ka Maalgelinta daymeed ee tayada biyaha.](#)

*-David Mayne, Maamulaha Isgaarsiinta Maalgelinta daymeed*